**Warbixin:** Diseembar 2022

SOMALI DIALOGUE PLATFORM

# Geeddi-socodkii Siyaasadeed ee Soomaaliya ee 2021-22

## Casharrada laga bartay iyo dimuqraadiyadda mustaqbalka

# Contents

**1. Hordhac** 3

1.1 Waqtiyada ay dheceen dhacdooyinkii doorashada la xiriiray (2017-2022) 6

**2. Casharrada muhiimka ee laga bartay** 7

2.1 Ballaarinta dimuqraadiyeynta Soomaaliya waa *caqabad siyaasadeed oo culus*, taasoo ay tahay in la waafajiyo danaha kala duwan ee iskasoo horjeeda lagana gudbo arrimaha muhiimka ah ee la isku hayo 7

2.2 Marka la eego hay'adaha dowladda Soomaaliya, wada xaajoodyadii ku saabsanaa nidaamka doorashada ayaa u kala qeybsamay wada hadal u dhexeeya dowladda federalka iyo dowlad-goboleedyada ah iyo hannaan baarlamaanku hoggaaminayo 9

2.3 Ku heshiinta iyo hirgelinta doorashooyinka ayaa dhalin kara xasillooni darro siyaasadeed iyo khilaaf 11

2.4 Doorashada xubnaha Aqalka Sare waxaa go'aamiyay madaxda Dowlad-goboleedyada 12

2.5 Guddiyada maamulayay doorashooyinka ayaa si fudud loo siyaasadeeyay 13

2.6 Ballaarinta tirada oday dhaqameedka ee geeddi-socodka doorashada ayaa kusoo beegantay iyadoo ay sii yaraaneyso sharciyaddooda 14

2.7 Daahfurnaan la'aanta xulista iyo maamulka ergada ayaa horseedday in la hareer maro ama loo arko in la hareer maray habraacii 15

2.8 Inta badan natiijooyinka doorashada xildhibaannada ayaa lasii go'aamiyey, taasoo xaddiday tartanka furan 16

2.9 Kuraas xaddidan ayaa lagu tartamay 17

2.10 Xaaladda oo aad loo siyaasadeeyay darteed, metelaadda haweenka ayaanan mudnaan la siin 18

2.11 Doorashada Madaxweynaha ayaa aad loogu tartamay, balse cod-iibsaga ayaa saameyn ku lahayd natiijada 18

2.12 Aragtida dadweynaha ee hannaanka doorashada waxa ay ahayd mid taban waxa ayna dareemeen inay saameyn taban ku yeelatay bulshada 20

**3. Gunaanad** 22

# 1. Hordhac

Tan iyo 2012-kii, markii Dowladda Federaalka Soomaaliya ay beddeshay Dowladdii Federaalka Kumeelgaarka ahayd, Soomaaliya waxa ay isku dayday in ay ballaariso hannaanka lagusoo xulo hoggaanka iyadoo la aadayo nidaam dimoqraadi ah. Ilaa iyo hadda, horumarka laga gaaray doorasho qof iyo cod ah ayaa ah mid xaddidan, halka geeddi-socodyada doorashadu ay noqdeen kuwo dhaliya colaado, islamarkaana weeciyeen howlaha kale ee aasaasiga u ah dowlad-dhisidda iyo horumarinta.

Iyadoo ay jirto xaaladdan, soo xulista madaxda siyaasadda ee dowladda federaalka waxaa marar badan saameyn ku lahaa doorashooyin dadban, oo aan ahayn doorasho 'qof iyo cod' ah, oo la isticmaalayo habka 4.5 ee metelaadda beelaha oo ay dowladda federaalka ka dhaxashay dowladdii kumeelgaarka ahayd. Sanadkii 2012, 135 oday ayaa soo xulay 275 xildhibaan, kuwaasoo iyaguna madaxweyne u doortey Xasan Sheekh Maxamuud. Inkastoo doorasho 'qof iyo cod' ah ay qeyb ka ahayd hanaankii kala guurka ee 'Hiigsiga 2016' kaasoo ay beesha caalamku ku taageereysay dowladda federaalka ee uu madaxweynaha ka ahaa Xasan Sheekh Maxamuud, hiigsigan ugu dambeyntii wuxuu noqday mid aan suuragelin. Taa beddelkeeda, Madaxweyne Maxamed Cabdullaahi Maxamed 'Farmaajo' waxaa 2017-kii doortay xildhibaanno lagusoo xulay nidaam doorasho dadban oo ay ku lug lahaayeen odayaasha beelaha iyo ergo ee dhammaan dowlad-goboleedyada. Qiyaastii 14,000 oo qof ayaa ka qeyb qaadatay geeddi-socodkii doorashadii dadbaneyd ee 2016/2017, oo lagu sifeeyay in ay lahayd cod iibsi iyo faragelin siyaasadeed oo muuqata.

Kadib markii si nabad ah xilka loogu wareejiyay Madaxweyne Farmaajo, waxaa mar kale soo ifbaxday rajada laga qabo in la qabto doorasho qof iyo cod ah oo markii ugu horeysay burburkii kadib ka dhacda dalka Soomaaliya. Sikastaba ha ahaatee, ballaarinta doorashada ayaa ugu dambeyntii lagu guul darreystay. Taa beddelkeeda, khilaaf la xiriiray hannaanka doorashada ayaa horseeday xasillooni-darro siyaasadeed iyo khilaaf. Markii ugu dambeyntii la hirgeliyay nooc doorasho, inkastoo xoogaa la ballaariyey, haddana waxaa lasoo jeediyay dhaleeceyn lamid ah habraacii hore. Bilowga muddo xileed cusub oo ah in Xasan Sheekh loo doortay madaxweynenimada markii labaad, ayaa waxa ay fursad u siinaysaa in dib loo milicsado geeddi-socodkii ugu dambeeyay si looga fogaado khilaaf hor leh oo ku saabsan doorashooyinka iyo in la tixgeliyo fursadaha hore u socodka iyo ballaarinta ka qeybgalka siyaasadda.

Haddaba, warbixintan waxa ay soo bandhigeysaa casharro laga bartay doorashooyinkii dadbanaa ee dib-u-dhacay sidoo kalena daba-dheeraaday ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya iyo Madaxweynaha ee qabsoomay muddadii u dhexeysay 2021-2022. Warbixintan waxa uu ujeedkeedu yahay in ay aragti ku biiriso wada-xaajood dhexmara jilayaasha siyaasadda Soomaaliya iyo guud ahaan shacabka ee sidii doorashada soo socda ay u noqon lahayd mid uu ku yaryahay khilaafka, sare u qaadeysa tartan doorasho oo xor iyo xalaal ah sidoo kalena sare u qaadeysa metelaadda bulshada. Warbixintan waxa ay ku saleysan tahay:

- Dib-u-eegis iyo isku uruurin lagu sameeyay falanqeynta ballaaran ee uu Platform-ka horey uga sameeyay hannaanka doorashada.

- Soo koobid iyo falanqeyn lagu sameeyay xogta doorashada ee si guud loo heli karo kuwaasoo si nidaamsan loosoo aruuriyey, Platform-kana uu falanqeeyay.

- Xog ku saabsan aragtida muwaadinka oo lagu helay doodo idaacado ay qabteen iyo kulamo/doodo kale ee uu taageeray Platform-ka sidoo kalena ay fududeeyeen dallada jilayaasha aan dowliga ahayn ee SONSA iyo Xarunta Horumarinta iyo Cilmibaarista Puntland ee PDRC ee lagu qabtay magaalooyin katirsan Dowlad-goboleedyada.

Warbixinta waxa ay soo bandhigeysaa casharro ku saabsan nidaamkii doorasho ee 2021/2022 kaasoo ugu dambeyntii lagu heshiiyey iyadoo loo maraayo wadahadal siyaasadeed; sidii loo fuliyay marxaladihii kala duwanaa ee doorashooyinkii dadbanaa; iyo ugu dambeyntii, sidii ay shacabka Soomaalida u arkeen.

Guud ahaan, falanqeyntu waxa ay muujineysaa in doorashooyinkii dhawaan dhacay ay ahaayeen kuwii ugu khaladka iyo xasilooni darrada badnaa tan iyo markii la dhisey dowladda federaalka sannadkii 2012. Inkastoo gabogabadii guusha lahayd ee bishii May 2022 iyo awood ku wareejintii madaxweynaha cusub ay keentay in ay xasilooni dalka dib ugusoo laabato, falanqeyntan waxa ay doonaysaa in ay dhiirigeliso dib u qiimeynta daneeyayaasha Soomaaliya ee sidii looga fogaan lahaa dib u dhacyo kuwan lamid ah, xaaladaha colaadaha hubeysan, iyo faragelin siyaasadeed. Casharrada kasoo baxay falanqeyntan ku saabsan kala-guurka siyaasadeed iyo dimuqraadiyeynta waxaa lagusoo koobi karaa:

- In lagu heshiiyo qaab doorasho loo dhan yahay oo ka dhacda Soomaaliya waxa ay ahayd caqabad *siyaasadeed*, taasoo u baahan wada-hadal siyaasadeed iyo isla jaanqaadka indheergaradka si loo gaaro – tayada geeddi-socodku waxa ay u badan tahay in lagu go'aamiyo heshiis laga gaaro hannaanka, halkii la dooran lahaa nidaam gaar ah.

- Kooxaha siyaasaddu waxay adeegsadaan madallo iyo hay'ado kala duwan si ay u riixaan ajendayaal gaar ah.

- Habka doorashada dadban ee 2021-22 oo lagu dooranayey Xildhibaannada Aqalka Sare iyadoo la marayo baarlamaannada Dowlad-goboleedyada ayaa awood weyn u siisay in ay madaxda Dowlad-goboleedyada go'aamiyaan natiijada doorashada, ama xaalado dhif ah marka la eego, ay ka dhigaan geeddi-socodka doorashada mid furan oo lagu tartamo.

- Weji kasta oo kamid ah doorashooyinka Golaha Shacabka waxa ay fursado cusub u siineysay madaxda dowladda federaalka iyo kuwa Dowlad-goboleedyada in ay saameyn ku yeeshaan natiijada, iyagoo ujeeddada guud maanka ku haya – oo ah doorashada madaxweynaha federaalka.

- Kordhinta odayaasha beelaha ee ka qeyb qaadanaya hannaanka doorashada dadban ayaa sababtay jahwareer iyo muran weyn oo ku saabsan sharci ahaanshaha odayaashu beelaha, taasoo kordhisay baaxadda wax-is-daba-marinta siyaasiyiinta.

- Xeerarka iyo qodobbada loo dejiyay in lagu kordhiyo ka qeybgalka haweenka iyo metelaaddooda ee hannaanka doorashada waxa ay ku guul darreysteen in lagu xaqiijiyo qoondadii boqolkiiba 30 ee lagu heshiiyey, waxaana ka faa'ideystay madax leh dano siyaasadeed.

- Nooca doorashada dadban waxa ay jilayaasha siyaasadda ku dhiirigelinayaa in ay bilowga hore diiradda saaraan 'dhamaadka geeddi-socodka' oo ah doorashada Madaxweynaha, arrintaas oo ka fogeyneysa musharraxiinta u tartamaya kuraasta baarlamaanka xaaladaha gudaha iyo metelaadda kuraas gaar ah.

- Hanaankii doorasho ee 2021/2022 looma arkin in ay ka faa'ideen dadka shacabka ah, sidoo kale dad badan ayaa dareemayey in doorashooyinka ay sii kordhiyeen xiisadda, kana weeciyeen diiradda siyaasadda arrimo kale oo muhiim ah.

- Xisbiyada siyaasaddu door rasmi ah kama ciyaarin guud ahaan hannaanka doorashada. Intii loo arki lahaa in ay shuruud u yihiin keliya doorashooyin qof iyo cod ah, horumarinta iyo qaabeynta nidaamka xisbiyada siyaasadeed ee Soomaaliya waxay saameyn togan ku yeelan kartaa geedi socodka doorashooyinka dadban.

## 1.1 Waqtiyada ay dheceen dhacdooyinkii doorashada la xiriiray (2017-2022)

### Febraayo 2017
Madaxweyne Maxamed Cabdullaahi Maxamed 'Farmaajo' ayaa xilka madaxweynaha la wareegay

### Juun 2018
Heshiiskii Baydhabo ee dowladda federaalka iyo dowlad-goboleedyada ee ku saabsanaa nooca doorashada: metelaad isku dheellitiran, oo ku saleysan hal degmo doorasho iyo liis xisbiyo oo xiran.

### Sebteembar 2018
Madaxda dowlad-goboleedyada oo ku kulmay magaalada Kismaayo ayaa ku heshiiyey nooc doorasho kale kaasoo ah metelaadda isku dheellitiran balse lagu beddelay hal degmo doorasho in lagasoo dooranayo xildhibaannada dowlad-goboleedyada iyo gobolka Banaadir. Tani waxay kusoo beegantay iyadoo dowlad-goboleedyadu ay xiriirka u jareen dowladda federaalka

### Nofeembar 2019
Guddiga kumeelgaar ah ee Baarlamaanka ayaa soo saaray warbixin uu baarlamaanka ku diiday 'Nooca Baydhaba' waxayna taa beddelkeeda soo jeediyeen in la qaato nooca horreeyaa guuleysta oo qoondeynta kuraastana lagu saleeyay nidaamka 4.5.

### Febraayo 2020
Sharciga Doorashooyinka Qaranka ayuu saxiixay Madaxweynaha kadib markii ay ansixiyeen labada aqal ee baarlamaanka Soomaaliya

### Febraayo-Maarso 2020
Iska horimaad hubeysan ayaa gobolka Gedo ku dhexmaray ciidamada Jubaland iyo kuwa dowladda federaalka Soomaaliya

### Maarso 2020
Soomaaliya ayaa markii ugu horreysay xaqiijisay in laga helay Covid-19

### Julaay 2020
Shirka Dhuusamareeb II ayaa dhacay ee u dhexeeyay madaxda fulinta dowladda federaalka, madaxda dowlad-goboleedyada iyo Guddoomiyaha Gobolka Banaadir.

### Ogosto 2020
Dhuusamareeb III waxaa dhacay kulan u dhexeeyay dowladda federaalka, madaxda saddex dowlad-goboleed iyo Guddoomiyaha Gobolka Banaadir. Kulankani waxaa lagu xaqiijiyay hirgelinta doorasho dadban

### Sebteembar 2020
'Heshiiska 17 Sebteember' waxa uu xaqiijinayaa nooca doorashada dadban oo ay ku heshiiyeen dhammaan madaxda dowlad-goboleedyada; Ra'iisul Wasaare Maxamed Xuseen Rooble ayaa isla maalintaas la magacaabay

### Diseembar 2020
Muddo xileedka Baarlamaanka Tobnaad ee Soomaaliya ayaa dhamaaday

### Febraayo 2021
Madaxweyne Farmaajo muddo xileedkiisa ayaa dhamaaday

### Febraayo 2021
Kulan dhex maray daneeyayaasha siyaasadda Soomaaliya oo ka dhacay Dhuusamareeb ayaanan wax is afgarad ah laga gaarin arrimaha doorashada.

### Febraayo 2021
Mudaaharaadyo ka dhacay magaalada Muqdisho ayaa waxaa xigay iska horimaadyo hubeysan oo dhex maray cutubyo ka tirsan ciidamada ammaanka Soomaaliya oo kala taageeraya dhinacyo kala duwan

### Abriil 2021
Taliyaha booliiska gobolka Banaadir ayaa iscasilay isagoo kasoo horjeestay isku dayga ay xubno katirsan baarlamaanka ku doonayeen in xilka loogu kordhiyo madaxweynaha. Iska horimaad kale ayaa dhex maray ciidamada ammaanka

### May 2021
Heshiis ayay saxeexeen madaxda dowladda federaalka iyo kuwa dowlad-goboleedyada ee ku saabsan doorashooyinka baarlamaanka iyo madaxweynaha

### Julaay 2021
Jubaland ayaa noqotay Dowlad-goboleedkii ugu horeeyay ee billowda doorashada xubnaha Aqalka Sare ee 2020/21

### Nofeembar 2021
Waxaa lasoo gaba-gabeeyay hannaanka doorashada Aqalka Sare; Kuraasta harsan ee lagu muransan yahay ayaa la xaqiijiyay. Doorashada Xildhibaanada Golaha Shacabka waxay ka bilaabatay dowlad-goboleedyada oo dhan. Doorashadan waxay ku socotay si goos goos ah muddo 5 bilood ah

### Maarso 2022
Al-Shabaab ayaa qarax ismiidaamin ah ku dilay Xildhibaan Aamina Maxamed Cabdi iyo dad kale xilli ay olole dib u doorasho ka waday magaalada Beledweyne

### Abriil 2022
Doorashooyin isbarbar socda ayaa ka dhacay Ceelwaaq iyo Garbahaarey ee Gedo (Jubbaland). Xildhibaannada labada dhinac ee la doortay ayaa aaday Muqdisho. Xubhihii lagu doortay Ceel-waaq ayaa baarlamaanka lagu dhaariyay

### May 2022
Xildhibaanno ku kulmay Muqdisho ayaa madaxweyne u doortay Xasan Sheekh Maxamuud.

# 2. Casharrada muhiimka ee laga bartay

## 2.1 Ballaarinta dimuqraadiyeynta Soomaaliya waa *caqabad siyaasadeed oo culus*, taasoo ay tahay in la waafajiyo danaha kala duwan ee iskasoo horjeeda lagana gudbo arrimaha muhiimka ah ee la isku hayo

Hannaanka siyaasadeed iyo sharciyad ee loo maray hannaankii doorashadii dadbaneyd ee Soomaaliya ee 2021/22 wuxuu ahaa mid daba dheeraaday. Kooxo siyaasadeed oo kala duwan ayaa u ololeeynayay noocyo doorasho oo iskasoo horjeeda kuwaasoo loo arkayay in ay u adeegayaan danahooda gaarka ah ee dib u doorasho ama ay yareynayaan fursadaha kooxaha kasoo horjeeda. Hannaan kasta oo lagu heshiinayo nooca doorasho waxay ahayd in looga gaaro is-afgarad maareynta arrimaha aadka u adag, sida caddeyn la'aanta maqaamka Muqdisho, ama saameynta al-Shabaab.

Hannaankii heshiiska siyaasadeed iyo sharciyeynta nooca doorashada 2021/22 ayaa ku guul darreystay in uu ka gudbo caqabadahaas islamarkaana uu soo saaro nooc doorasho toos ah oo si fiican loo qeexay la iskuna raacsan yahay. Taa beddelkeeda, faahfaahinnadii muhiimka u ahaa qaabeynta doorashada ayaa la dhinac maray ama aan la dhameystirin, oo ay kamid yihiin qeexidda deegaan doorashada, iyo rasmiyeynta xisbiyada siyaasadda. Muhiimadda koowaad waa in la siiyaa in la helo wada-shaqeyn iyo wada-xaajood siyaasadeed loo dhan yahay oo wax ka qaban kara arrimaha la isku hayo ee lagama maarmaanka u ah qaabeynta doorashada iyo is afgaradka siyaasiyiinta doorashada xigta.

Marxalad kasta ee uu geeddi-socodku marayay, caqabadaha siyaasadeed ee ku horgudbanaa in la hormarinayo dimuqraadiyeynta, sida danno muddo-gaaban ah ama arrimo la isku khilaafsan yahay oo muddo fog ahba, waxa ay ahaayeen kuwo cad. Markii uu xafiiska la wareegay 2017, maamulkii Madaxweyne Farmaajo waxa uu fursad fiican u heystay in uu sii ambaqaado doorashooyinkii la ballaariyay ee 2016, iyo horumarro gaar ah oo dhinaca dimuqraadiyadda ah oo uu gaaray maamulkii ka horreeyay. Kuwaas waxaa kamid ahaa dhisidii Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka Qaranka sanadkii 2015, iyo in la meelmariyay sharciga xisbiyada siyaasadda sanadkii 2016, taasoo suuragelisay in loo diiwaangeliyo ururrada siyaasadda si kumeelgaarka ah. Sikastaba ha ahaatee, horraantii muddo xileedkii Farmaajo, tallaabooyin muhiim ahaa lama qaadin, sida dhismaha maxkamadda dastuurka iyo dhameystirka dib-u-eegista dastuurka, xiriirka ka dhexeeya dowladda federaalka iyo Dowlad-goboleedyada ayaa xumaaday, taasoo qeyb ahaan ka dhalatay la kala safashada dalalka ee xiisaddii Golaha Iskaashiga Khaliijka. Intaa waxaa dheer, xaaladda amniga hormar muuqda lagama sameynin.

Xaaladdan awgeed, waxaa la siyaasadeeyey tixgelinta naqshadeynta iyo hirgelinta doorashada, iyadoo kooxo siyaasadeed oo kala duwani ay u ololeynayeen qaabab doorasho oo u adeegaya danahooda ama hab-fekerkooda. Bishii Ogosto 2017, iyadoo loo marayo guddi farsamo oo aan rasmi ahayn oo ay dhistay, dowladda ayaa bilowday inay ka shaqeyso

diyaarinta nooca doorashooyinka soo socda. Guddiga waxa uu soo jeediyay nooca metelaadda isku dheelitiran iyo hal degmo doorasho iyo liis xisbi oo xiran. Qeyb ahaan, tani waxay ahayd dadaal macquul ah oo lagula tacaalayo caqabadaha ku xeeran deegaan doorashada, maqaamka Muqdisho oo aan cadeyn, iyo gacan ku haynta al-Shabaab ee qeybo kamid ah dhulka. Intaa kadib, guddigii farsamo ayaa la ballaariyay laguna daray xubno ka socda Dowlad-goboleedyada waxayna noqdeen Guddiga Farsamada iyo Wada-xaajoodka Federaalka (FNTC), kaasoo ka shaqeeynayay in la gaaro heshiisyada u dhexeeyey dowladda federaalka iyo Dowlad-goboleedyada ee nidaamka doorashada iyo arrimo kale. Nooca metelaadda isku-dheellitiran ee liiska xeran waxaa bishii Juun 2018-kii Magaalada Baydhaba ku aqbalay dhammaan madaxdii Dowlad-goboleedyada. Sikastaba ha ahaatee, xiisadahii u dhexeeyay dowladda federaalka iyo dowlad-goboleedyada awgeed, waxa ay islamarkiiba la laabteen taageeradoodii, kadibna waxay ku heshiiyeen nooc doorasho kale oo metelaadda isku-dheellitiran ah, balse degaan doorashada ka dhigaya heer Dowlad-goboleed, iyo sidoo kale gobolka Banaadir, taasoo awood xakameyn siineysa Dowlad-goboleedyada.

Inkastoo aanan la isku afgaran, haddana guddiga doorashada ee aan rasmiga ahayn ayaa lixdii bil ee dambe ee 2018-ka billaabay diyaarinta hindise sharciyeedka doorashada, iyadoo laga duulayo heshiiskii Baydhabo, sidoo kale bishii May 2019-ka, golaha wasiirrada ayaa ansixiyay hindise sharciyeedka si uu baarlamaanka dib-u-eegis ugu sameeyo. Hindise sharciyeedka ayaa lagu saleeyay heshiiskii Baydhaba, balse labo isbedel uu lahaa oo muran dhaliyay ayaa kala ahaa: Qodobka 12-aad oo dhigayay in si toos ah loo doorto Madaxweynaha Soomaaliya, halka qodobka cusub ee 56 uu oggolaadey in muddo kordhin aan la cayimin loo sameeyo Madaxweynaha iyo Baarlamaanka haddii ay dhacdo 'dhibaatooyin qaran'. Isbeddelladani waxaa ka dhashay fikrado ah in u jeedka dowladda ee qabashada doorashooyin qof iyo cod ah ay dhab ahaantii ahayd dadaal lagu abuurayo muddo kordhin waxa ayna keentay in lasii siyaasadeeyo arrinta.

Hindise sharciyeedka oo ay ansixiyeen Golaha Wasiirada ayaa la horgeeyay Golaha Shacabka, oo u leexiyey dhinac ka duwan kii hore oo diiradda lagu saaray ilaalinta nidaamka 4.5 iyo kuraasta xildhibaanada. Bishii Nofeembar 2019, guddiga kumeelgaarka ah ee dib-u-eegista ee baarlamaanka, oo la aasaasay horraantii sanadkaas, ayaa baarlamaanka warbixin usoo gudbiyey iyaga oo diiday noocii doorasho ee Baydhaba, taa beddelkeedana waxay soo jeediyeen nidaamka horreeyaa guuleysta kuraastana waxaa lagu saleeyay beelaha iyadoo la raacayo nidaamka 4.5. Guddigan ayaa sidoo kale soo jeediyay in meesha laga saaro qodobka qeexaya doorashada tooska ah ee Madaxweynaha, waxa ayna qodobka muddo kordhinta ka dhigeen in loo gudbiyo keliya Baarlamaanka. Bishii Febraayo 2020, Sharciga Doorashooyinka Qaranka, oo inta badan ku saleysan talooyinka guddiga kumeelgaarka ahaa ee baarlamaanka, ayaa waxaa ansixiyey labada aqal ee Baarlamaanka, waxaana saxiixay Madaxweynaha. Nooca doorasho ee sharciga ee la ansixiyay ayaa soo jeediyay isku-dhaf adag oo doorasho qof iyo cod ah iyo metelaad qabiil ku saleysan, ma aanu caddeynin qodobbada muhiimka ah, waxa uuna dhaliyey caqabado badan oo farsamo iyo kuwo maamul isugu jira. Tani waxay dhalisay shaki ku saabsan in hindise sharciyeedka loogu talagalay in lagu burburiyo hirgelinta doorasho qof iyo cod ah, taasoo horseedda muddo-kordhin ama in dib loogu noqdo qaab doorasho dadban, oo xildhibaanno badan ay door bidayeen.

Caqabadaha laga dhaxlay hindise sharciyeedka keliya ma ahayn kuwa ka dhashay dano siyaasadeed oo waqti-gaaban ah — waxaa sidoo kale ka dhashay caqabado is daba joog ah oo heshiis ka gaaridda nooca doorashada ka dhigtay mid aad u adag, gaar ahaan arrimaha la xiriira qeexidda deegaan doorashada iyo ka gudbidda nidaamka qabiilka. Xeerku ma aanu qeexin deegaan doorashada iyo metelaadda (maamullada, gobollada, ama degmooyinka). Soohdimaha maamul ee kahor 1991-kii ayaa la siyaasadeeyay, degmooyin badan oo cusubna si aan rasmi ahayn ayaa loo abuuray tan iyo

wakhtigaas. Tan waxa ay sii adkeysay xaqiiqda ah in maqaamka Muqdisho uu yahay mid aan kala cadeyn – haddii ay noqoneyso caasimad, gobol ama dowlad-gobolleed. Waxa kale oo loo baahnaan doonaa heshiis ku aaddan doorashada gobollada ay maamulaan Soomaaliland iyo Al-Shabaab. Intaa waxa dheer, sharcigu kuma caddayn habka loosoo dooranayo wakiillada Soomaaliland, inkastoo ay qeyb muhiim ah ka yihiin baarlamaanka, hadanna saameyn xaddidan ayay ku leeyihiin (ama sharciyad xaddidan) deegaan-doorashada ay ahayd inay metelaan.

Hindise-sharciyeedka ayaa taageero ballaaran ka helay Baarlamaanka, inkastoo arrimahan cakirnaanta iyo madmadowga leh ay ku jiraan, maadaama loo arkayay inuu yahay mid ku habboon danaha xildhibaannada, ama ay ku helayaan muddo kororsi, taasoo horseedaysa in dib loogu noqdo hannaankii doorashada dadban oo ay aqoonta u lahaayeen, ama ugu yaraan qabashada doorasho lagu saleeyo nidaamka 4.5 oo ay horey ugu faa'iideen. Falcelinta dowlad-goboleedyada ayaa ugu dambeyntii keentay fashilinta hindise-sharciyeedka. Waxaa xusid mudan in Puntland iyo Jubaland ay wadeen dadaallo lagu xagal-daacinayo dadaallada lagu doonayay in lagu hirgeliyo doorasho qof iyo cod ah, iyagoo doorbidayay hannaan doorasho dadban oo ay awood badan ku leeyihiin natiijada, taasoo wiiqi kartay dib u doorashada Madaxweyne Farmaajo. Madaxda kale ee dowlad-goboleedyada, inkastoo ay aad isugu dhawaayeen Madaxweyne Farmaajo, waxa ay sidoo kale doorbidayeen hannaan doorasho dadban. Waxaa intaa dheer, sharciga doorashada waxa uu Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka Qaranka farayay in ay maamulaan hirgelinta doorashada, taasoo ay dowladda federaalka u arkaysay in uu yahay xalka keliya ee macquulka ah, halka Puntland iyo Jubaland ay u ololeeyeen in ay lahaadaan guddiyo maamula doorashada, taasoo siineysa in ay xakameeyaan iyagoo ka cabsanayay faragelin uga timaada Muqdisho. Xitaa xildhibaanadii u codeeyay sharciga, qaar badan ayaa ku dooday in inkastoo sharcigu ku habboon yahay guud ahaan qeexida habka doorashada, haddana weli waa in la raadiyo nooc doorasho kale sanadka 2020/21. Dadka qaar ayaa xitaa qiyaasay in hindise sharciyeedka uu ahaa mid si ula kac ah loo dejiyay si uusan u yeelan habraac cad, iyadoo ujeedadu tahay in la qasbo adeegsiga hab doorasho kale oo ka duwan (oo ah doorasho aan toos ahayn), ama xitaa uu u baahan yahay in baarlamaanka sameysto muddo kordhin, taasoo faa'iido u ah xildhibaanada.

Ismariwaagan siyaasadeed ayaa ka sii daray kadib markii Covid-19 dilaacay horraantii 2020, taasoo sii carqaladeysay isu diyaarinta doorashooyin qof iyo cod ah. Jadwalka doorashada ee lasoo jeediyay ayaa qeexayay in doorashadu ay dhammaan doonto kahor dhammaadka muddada baarlamaanka ee 27-ka Diseembar 2020, sidoo kale dib-u-dhac dhowr bilood ah oo ku aaddan bilowga diiwaangelinta codbixiyeyaashu ayaa u baahaneyd muddo kordhin farsamo. Inkastoo la meelmariyay sharcigii doorashada, haddana waxaa muuqaneysay in aan weli la helin heshiis siyaasadeed oo ku filan oo lagu qabto doorashada Soomaaliya. Sheekadu waxay isku beddeshay in la isku raaco nidaam doorasho dadban.

## 2.2 Marka la eego hay'adaha dowladda Soomaaliya, wada xaajoodyadii ku saabsanaa nidaamka doorashada ayaa u kala qeybsamay wada hadal u dhexeeya dowladda federalka iyo dowlad-goboleedyada ah iyo hannaan baarlamaanku hoggaaminayo

Guud ahaan, hannaanka siyaasadda ee ka heshiinta nooca doorashada waxaa ku loollamayay hay'ado kala duwan, halkii ay sameyn lahaayeen howl-wadeennada hay'adaha ay khuseyso. Dadaalladii ay bilowgii sameeyeen madaxda dowladda federaalka iyo kuwa dowlad-gobolleedyada ee dhisidda guddi farsamo iyo heshiiskii Baydhaba ee 2018 ayaa noqday kuwo aan miro dhal noqon iyadoo xildhibaannada – oo la dhinac maray marka ay dadaalladan socdeen – ay qaateen nooc doorasho oo ka duwan kii hore. Intaa

kadib, waxaa jiray jahwareer ku saabsan sida wada-hadalka siyaasadeed ee u dhexeeya dowladda federaalka iyo dowlad-goboleedyada loola xiriirin lahaa geeddi-socodka sharci-dejinta ee baarlamaanka, iyadoo jilayaal kala duwan ay doonayeen inay xoojiyaan mid kamid ah noocyada doorasho si ay saameyn ugu yeeshaan. Kadib saxiixii sharciga doorashada ee bishii Febraayo 2020, guddoonka Golaha Shacabka wuxuu sii waday taageeridda ajendaha Madaxweynaha si loo meelmariyo xeer-hoosaadyadii ay soo jeediyeen Guddiga Isku-dhafka ah ee Baarlamaanka ee dhowr arrimood oo ku jiray sharciga doorashooyinka oo lagu muransanaa, halka Aqalka Sare uu u muuqday in uu isku dayayay in uu hakiyo geeddi-socodkan, isagoo ku baaqay wada-hadal degdeg ah oo lala yeesho dowlad-goboleedyada kahor inta uusan Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka Qaranku soo bandhigin qorshaha howlgal ee doorashooyinka. Xaaladdan, ma jirin hal madal oo lagu galay dood qaran, waxaana ugu dambeyntii fashil ku dhammaaday dadaalkii baarlamaanka ee nidaamka doorashada. Kulamadii xigay ee ka dhacay Dhuusamareeb ayaa muujinayay in dib loogusoo laabtay wada-hadalladii u dhexeeyey dowladda federaalka iyo dowlad-goboleedyada ee hareer marsanaa Baarlamaanka. Sikastaba ha ahaatee, Golaha Shacabka ayaa dhamaadkii bishii Luuliyo codka kalsoonida kala laabtay Ra'iisul Wasaare Xasan Cali Khayre, kadib shirkii labaad ee Dhuusamareeb, waxaana loo arki karay dadaal uu Madaxweynuhu ku doonayay in uu dib usoo ceshado doodda doorashada iyadoo loo marayo Baarlamaanka.

Markii la gaaray Ogosto 2020, hannaanka wada-hadalka dowladda federaalka iyo dowlad-goboleedyada wuxuu noqday madasha ugu weyn ee arrimaha doorashada looga doodo. Heshiiskii bishaas lagu gaaray shirkii saddexaad ee Dhuusamareeb, kaasoo u dhexeeyay xubno ka tirsan dowladda federaalka, madaxda saddexda dowlad-goboleed iyo guddoomiyaha Gobolka Banaadir, ayaa lagu heshiiyay nidaam doorasho dadban, iyadoo isbedello ka duwan doorashadii 2016/2017 la sameeyay, sida kororka tirada goobaha doorashada iyo ergooyinka. Heshiis muhiim ah ayaa bil kadib la gaaray 'Heshiiska 17-ka Sebteembar', kaasoo lagu xaqiijiyay nidaamka doorashada dadban, laguna gaaray is-afgarad guud ee dhammaan dowlad-goboleedyada, iyadoo tirada ergooyinka doorashada kursigiiba laga dhigay 101 ergo oo dowlad-goboleed walba ka codeynayaan 2 goobood. 101-da ergo ee kursi walba oo kamid ah 275-ta kursi ee Golaha Shacabka ayaa dhamaantood ka imaanayay qabiilka/jilibka loo qoondeeyay kursiga, ugu yaraan boqolkiiba 30 ayaa haween noqonaya. Heshiisku waxa uu meesha ka saaray doorki Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka Qaranka, taa beddelkeedana waxa uu dhigayay in hab maamul doorasho oo labo heer ah la sameeyo: Guddiga Hirgelinta Doorashada ee heer Federaal oo kormeeri doona geeddi-socodka doorashada, halka Guddiga Hirgelinta Doorashada Heer Dowlad-goboleed uu mas'uul ka noqon doono heerka dowlad-goboleed ee hirgelinta doorashooyinka, oo ay kamid tahay xaqiijinta liiska ergooyinka iyo maamulidda codeynta. Tani waxa ay saameeyn balaaran siisey madaxda Dowlad-goboleedyada waxayna gacan ka geysatay helidda taageerada Jubaland iyo Puntland. Waxa kale oo jiray heshiis ahaa in la sameeyo Guddiga Xallinta Khilaafaadka Doorashooyinka.

Sikastaba ha ahaatee, fulinta heshiiska ayaa markaas noqday mid adag, iyadoo uu sii xoogeysanayay khilaafyada la xiriira magacaabista hay'adaha maamulka doorashada, xiisadda ka dhalatay doorashada Garbahaarey, iyo habka loo maareynayey doorashada kuraasta Aqalka Sare.[1] Fashilka ku yimid shirkii 4-aad ee Dhuusomareeb ee horaantii bishii Febraayo 2021 ayaa horseeday isku-daygii ugu dambeeyay ee Madaxweyne Farmaajo uu ku doonayay in uu dib usoo celiyo awoodiisa isagoo abaabulay baarlamaanka bishii Abriil si muddo xileedka labo sano loogu kordhiyo, si dalka loo gaarsiiyo doorashada qof iyo cod ah. Kadib heshiiskii 27-kii May ee dhexmaray dowladda federaalka

1. Xaqiiqda ah in Ra'iisul Wasaare Maxamed Xuseen Rooble uu magacaabay Madaxweynaha isla maalintii uu dhacay heshiiskii 17-kii Sebtember, waxa ay dad badan ku macneeyeen in ay calaamad u tahay isku dayga Farmaajo uu ku doonayay in uu ku maamulo wada xaajoodka arrimaha doorashada isagoo magacaabay Ra'iisal Wasaare oo (markii hore) loo arkayay in in uu fulin doono ajendahiisa.

iyo dowlad-goboleedyada, waxaa dhaboobay sarreynta wadaxaajoodka iyo heshiisyada Madasha Wadatashiga Qaran ee arrimaha doorashada.

## 2.3 Ku heshiinta iyo hirgelinta doorashooyinka ayaa dhalin kara xasillooni darro siyaasadeed iyo khilaaf

Dadaalladii ahaa in lagu heshiiyo doorasho ayaa horseeday qalalaasihii siyaasadeed ee ugu darnaa ee soo mara taariikhda dhow ee Soomaaliya, taasoo qarka u saartay dalka in uu dib ugu laabto colaadihii hubeysnaa. Lagasoo bilaabo Diseembar 2020 ilaa Janaayo 2021, heshiiska u dhexeeyay siyaasiyiinta Soomaaliya ee geeddi-socodka doorashada ayaa sii adkaanayey, horumarkuna wuu istaagay, inkastoo la isku dayayay in dib loo cusboonaysiiyo wadahadal, la dejiyo xiisadaha, lana raadiyo isku tanaasul. Muddo xileedka baarlamaankii tobanaad wuxuu ku ekaa dhammaadkii Diseembar 2020.[2] Sikastaba ha ahaatee, ma jirin waddo kale si loo hirgeliyo doorashada iyadoo Puntland iyo Jubaland ay dib u dhigteen magacaabistooda xubnaha guddiga doorashooyinka heer dowlad-goboleed waxa ayna ku adkeysteen in dhisidda guddiyada heer dowlad-goboleed ay ku xiran tahay ka bixitaanka ciidamada dowladda federaalka ee gobolka Gedo, taasoo caqabad ku noqotay billaabashada doorashada. Muran ayaa sidoo kale ka jiray xubnihii guddiga doorashada Soomaaliland loo lagacaabay.

Iyadoo uu jiro khilaafkan sii kordhayay, hoggaamiyeyaasha siyaasadda Soomaaliya ayaa horraantii Febraayo 2021 ku kulmay Dhuusamareeb kulankaasoo ahaa dadaal aan lagu guuleysan oo lagu xallinayey khilaafka jiray. Taasi waxa ay keentay in la gaaray 8-dii Febraayo ee uu si rasmi ah u dhamaanayey muddo xilleedkii Madaxweyne Farmaajo iyadoo aan la helin waddo cad oo doorashada lagu ambaqaado, sharciyadda dowladda federaalka ayaana siyaabo kala duwan loo fasiray loona siyaasadeeyay. Kadib markii uu dhamaaday muddo xilleedkii Farmaajo, xubnaha Golaha Midowga Musharraxiinta Madaxweynaha ayaa billaabay abaabul ay ku diidayaan sharciyadda dowladda. Waxaa la sameeyay dadaallo lagu badbaadinayo hannaanka doorashada. Guddi farsamo oo ay Golaha Wadatashiga Qaran u magacaabeen una xilsaareen xallinta arrimaha harsan ee la isku hayey – oo ay ku jiraan dhismaha guddiyada fulinta doorashooyinka, doorashada Gedo, iyo habka lagusoo xulayo kuraasta Soomaaliland – ayaa ku kulmay Baydhabo.

Inkastoo uu guddiga hormar sameeyay, shirka Baydhabo ayaa kusoo beegmayaa iyadoo Golaha Midowga Musharraxiinta ay isku diyaarinayeen banaanbax loogasoo horjeedo madaxweynaha oo Muqdisho ka dhacaya. Maalin kahor maalinkii la qorsheeyey banaanbaxa, dagaal u dhexeeya ciidamo taabacsan Yuusuf Maxamed Siyaad ‘Indha Cadde’ iyo ciidamada dowladda federaalka ayaa ka dhacay bartamaha magaalada Muqdisho. Maalintii xigtay waxaa dib usoo cusboonaaday dagaalka, iyadoo uu socday banaanbax ay horkacayeen xubnaha mucaaradka ugu cadcaddaa, taasi oo meesha ka saartay fursad kasta oo heshiisyadii ay gaareen guddiga farsamada lagusoo dhaweyn karay.

Dabayaaqadii bishii April, Soomaaliya waxa ay qarka u fuushay in uu Muqdisho ka dhaco iska horimaad kale oo hubeysan iyadoo ciidamada ammaanka ay ku kala qeybsameen xoogagga siyaasadeed kadib dadaalkii Madaxweyne Farmaajo uu ku doonayay in uu ku sameysto muddo kororsi. Isku-day aan guuleysan ayay sameeyeen qaar kamid ah xildhibaanada Golaha Shacabka si ay u ansixiyaan muddo kordhin iyo in doorasho toos ah la qabto labo sano gudahood. Ciidamo ka tirsan dowladda ayaa muddo kordhinta ka horyimid iyadoo ay Villa Soomaaliya shaqada ka ceyrisay ciidamadan. Mudaaharaadyadii dhacay habeennadii 16 iyo 17 Abriil waxay isku beddeleen rabshado kaddib markii ciidamo la safan mucaaradka ay isku dheceen

2. Xildhibaanada ayaa, sikastaba ha ahaatee, horay u ansixiyay muddo kordhintooda ilaa baarlamaanka kow iyo tobnaad la soo xulayo, inkastoo ay u mareen sharciyad la duray.

xoogag taageersan dowladda federaalka. 25-kii Abriil, weeraro ay ciidamo taabacsan dowladda federaalka ku qaadeen hoyga ay bariga Muqdishu ka degganaayeen labo musharax madaxweyne ayaa sababay in ciidamo badan oo mucaarad ku ah dowladda lagasoo abaabulo gobollada ku dhow Muqdishu, waxaana dagaalku uu ku fiday koonfurta iyo galbeedka Muqdisho. Heshiiskii siyaasadeed ee dowladda federaalka Soomaaliya wixii ka dambeeyay 2012-kii waxaa soo wajahay khatartii ugu weyneyd, waxayna xaaladdu kasoo laabatay qarka markii ay ku dhawaad dhammaan deegaannada dalka oo ay ku jiraan madaxdii dowlad-goboleedyada ku dhawaaqeen inay kasoo horjeedaan muddo kordhinta Farmaajo iyagoo markii hore la safnaa Madaxweynaha. Villa Soomaaliya waxa ay sidoo kale ku guuldarreysatay in ay taageero ka hesho Midowga Afrika, waxaana soo food saaray hoos-u-dhac dhaqaale. Bilowgii bishii May ayaa Farmaajo waxa uu ka codsaday Golaha Shacabka in ay dib uga laabtaan muddo kordhintii hore waxa uuna ku dhawaaqay in Ra'iisul Wasaaraha uu hoggaamin doono hannaanka doorashada.

Kadib markii la dejiyey xiisaddii, waxaa la qabtay shir cusub oo ay isugu yimaadeen madaxda, waxaana 27-kii May 2021 la saxiixay heshiis siyaasadeed oo dib u habeyn loogu sameeyay hannaanka doorashada ee uu garwadeen ka ahaa Raysal Wasaare Rooble, heshiiskaas ayaa soo afjaray khilaafkii ka taagnaa dhaqangelinta heshiiskii 17-kii Sebteembar. Waxaa heshiiskan cusub lagu dhisay heshiiskii 17kii Sebteembar, waxaa sidoo kale lagu daray qaar kamid ah talooyinkii guddigii farsamada ee Baydhabo. Sidii hore oo kale, waxaa jiray arrimo la xiriira hirgelinta heshiiska oo u baahnaa caddeyn dheeraad ah, sida habka xulista ergada, nidaaminta amniga doorashada, iyo qoondada haweenka. Waxaa kale oo aan la caddeynin qorshaha dib-u-heshiisiin iyo doorasho ee gobolka Gedo. Sikastaba ha ahaatee, wuxuu ahaa heshiiskii 27-kii May midka ugu dambeyntii keenay horusocodka geeddi-socodka doorashada dadban.

## 2.4 Doorashada xubnaha Aqalka Sare waxaa go'aamiyay madaxda Dowlad-goboleedyada

Nidaamka doorashada ee lagusoo xulay xubnaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka ayaa waxaa qeyb ka ahaa in madaxweynayaasha Dowlad-goboleedyada ay soo magacaabaan musharixiinta, kadibna waxaa u codeeyay xubnaha baarlamaanka ee Dowlad-goboleedyada. Habkan doorasho oo aan tooska ahayn waxa ay siiyay madaxda Dowlad-goboleedyada awood ay kusoo doortaan senatarada, sikastaba ha ahaatee, xaallado aad u yar ayaa jiray oo ay hoggaanka Dowlad-goboleedyada u adeegsadeen awooddan si ay geedi socodka uga dhigaan mid furan oo lagu tartamo. Iyadoo lagu suntay wax is daba marin heerkeedu sarreeyo, dhaqangelinta doorashada Aqalka Sare ayaa waxa ay si hordhac ah u muujisay sida ay u dhici doonto doorashada xubnaha Golaha Shacabka.

Doorashada Aqalka Sare ayaa ka billaabatay Jubaland bishii Luulyo 2021. Inta badan madaxda Dowlad-goboleedyada ayaa awooddooda u adeegsaday hubinta in saaxiibbada u dhow ay ku guulaystaan kuraasta Aqalka Sare. Xaaladaha qaar, tani waxay keentay in si cad loogu diido musharixiinta u tartamayay kursiga in ay isdiiwaangeliyaan, laakiin inta badan, waxa ay ahayd in madaxda Dowlad-goboleedyada iyo baarlamaanka dowlad-goboleedyadu horey ugusii heshiiyeen guuleystayaasha ka hor codeynta. Inkastoo hannaankii doorashada Aqalka Sare uu ahaa mid qasbayay in kursi kasta uu lahaado ugu yaraan labo tartame, haddana dhaqanka ah in musharax boos haye ah (*malxiis*) uu ka tanaasulo tartanka daqiiqado yar kahor codeynta ayaa baahsaneyd. Xaalado badan marka la eego, musharraxiinta la doorbidayay ayaa ku guulaystay codad aad u badan.

Marka la eego Kuraasta Aqalka Sare ee Soomaaliland, saameyntu waxay u kala qeybsaneyd kooxo siyaasadeed oo kala duwan taasoo keentay in loo tartamo kuraas kooban. Hirshabeelle ayay iyaduna arrintan ka muuqatay,

waxa ayna muujisay in haddii la helo rabitaan siyaasadeed uu dhici karo tartan furan oo ku saleysan nooca doorasho ee lagu heshiiyey. Madaxweyne Guudlaawe ayaa u sheegay baarlamaanka dowlad-goboledka Hirshabeelle in doorashada Aqalka Sare ay u furan tahay musharraxiinta kala duwan taasoo ka duwaneyd doorashooyinkii ka dhacay dowlad-goboleedyada kale. Madaxweynaha Dowlad-goboleedka ayaa soo saaray liiska 33 musharrax oo kamid ah musharraxiinta Aqalka Sare 8-dii Sebteembar, waxaana tartanka uu socday ilaa horraantii Oktoobar. Inkastoo tani ay ahayd hannaankii magacaabis ee ugu furnaa ee Aqalka Sare ee Dowlad-goboleedyada, haddana waxaa la sheegay in lacagihii ugu badnaa lagu bixiyey doorashadaas, iyadoo cabashooyin iyo wax is daba marin la diiwaangeliyay.

## 2.5 Guddiyada maamulayay doorashooyinka ayaa si fudud loo siyaasadeeyay

Guddiyada loo igmaday inay maareeyaan doorashada 2021-22 ayay siyaasiyiinta usoo xusheen xubno ka shaqeyn kara danahooda ama waxay ka dhigeen kuwo aan awood lahayn. Guddiyada doorasho ee heer dowlad-goboleed waxaa hoggaaminayay kana koobnaayeen xulafada madaxda dowlad-goboleedyada. Marka la eego xallinta khilaafaadka, musharraxiinta liiska codeynta ku jiray keliya ayaa gudbin karay cabashooyin taasoo ka hor istaagtay in guddiga xallinta khilaafaadka uu xalliyo caqabadaha yimaada marxaladaha hore ee geeddi-socodka doorashada, sida eedeymaha la sheegay in shaqsiyaad gaar ah laga hor istaagay diiwaangelinta musharraxnimada kuraasta. Markii dambe, wax-qabad la'aanta guddiga xallinta khilaafaadka ayaa ka dhignaa in khilaaf kasta oo weyn lagu xalliyo iyada oo loo marayo wadahadal u dhexeeya siyaasiyiin, taasoo kor u qaadday siyaasadeynta hannaanka doorashada.

Doorka Guddiga Xallinta Khilaafaadka waxaa qaabeeyay dhaqdhaqaaqyada siyaasadeed. Marka loo eego hannaankii doorasho ee 2016/2017, Dowlad-goboleedyada waxay ahaayeen kuwo si weyn uga dhex muuqda saaxadda siyaasadda, waxayna ahaayeen kuwo ku kala aragti duwan mowqifkooda ku aaddan hoggaanka dowladda federaalka, taasoo kordhisay faragelinta ay ku hayeen hannaanka. Hab-raacyada iyo waqtiyada uu soo bandhigtay guddiga heer federal ee hirgelinta doorashooyinka waa la iska indhatiray, doorka uu ku leeyahay geeddi-socodka doorashada xubnaha Golaha Shacabkana aad ayuu u xaddidnaa. Guddiyada hirgelinta doorashooyinka ee heer dowlad-goboleed, oo inta badan hoos taga madaxda Dowlad-goboleedyada, baaritaanno ku filan laguma sameynin ficilladooda, waxa ayna door hoggaamineed ka qaateen maamulka doorashooyinka xildhibaannada Golaha Shacabka. Daacadnimada inta ugu badan, haddaysanba noqon dhammaantood, ee guddoonka guddiga hirgelinta doorashada iyo dalaalada siyaasadeed, ee madaxweynayaasha Dowlad-goboleedyada si weyn ayay u muuqatay. Guddiyada hirgelinta doorashada ee kuraasta Soomaaliland iyo Banaadir waxaa loo qaabeeyey si ka duwan, taasoo aan la yaab lahayn marka la eego mawqifyada aan caddeyn oo ay ku leeyihiin nidaamka federaalka, taasoo fursad weyn siisay dowladda federaalka inay si khaldan u maamusho hannaankooda doorasho. Gacan ku heynta guddiga hirgelinta doorashada Soomaaliland ayaa si gaar ah loogu loollamay.

Maadaama ay maqneyd hay'ad leh sharciyad garsoor, Guddiga Xallinta Khilaafaadka Doorashada waxaa loo igmaday in uu go'aamiyo in la jabiyay xeerarkii doorashada iyo haddii natiijada doorashada la burinayo. Inkastoo ay jireen caddeymo badan oo muujinaya in la jebiyey sharciga, ma jirin natiijo la diidey, Guddiga Xallinta Khilaafaadka Doorashadana waxa uu u muuqday in uu sharciyeeyay geeddi-socodyadii doorasho ee sida aadka ah loo farageliyey. Isbeddelka hoggaanka Guddiga Xallinta Khilaafaadka Doorashada ee Janaayo 2022 ayaa wax yar ka beddeshay qaabka shaqadooda. Guddiga Xallinta Khilaafaadka Doorashada ayaa markii hore qabtay cabashooyin, baaris ku sameeyay, ugu dambeyntiina fasaxay lix musharrax oo ay ku jiraan

Kuraasta ay ku tartamayeen Ra'iisul Wasaare ku xigeenka iyo Ku-simaha Agaasimaha Hay'adda Nabad Sugidda iyo Sirdoonka Qaranka. Marka loo eego habraaca Guddiga Xallinta Khilaafaadka Doorashada, sikastaba ha ahaatee, musharraxiinta ama ergada keliya ayaa xaq u laheyd inay soo gudbiyaan cabashooyinka, kadib marka ay bixiyaan lacag dhan USD 3,000 oo diiwaangelin ah. Qodobka qeexaya cidda cabashada gudbin karta ayaa ka hor istaagay dad badan oo hammi lahaa balse la sheegay in laga hor istaagay musharraxnimada in ay soo gudbiyaan cabashooyin, iyadoo Guddiga Xallinta Khilaafaadka Doorashada uu diiday dhammaan kiisaskii loosoo gudbiyay, lacagta diiwaangelinta ayaa ka niyad jebisay xubno cabasho qabay in ay soo gudbiyaan cabashooyinkooda.[3]

## 2.6 Ballaarinta tirada oday dhaqameedka ee geeddi-socodka doorashada ayaa kusoo beegantay iyadoo ay sii yaraaneyso sharciyaddooda

Nooca doorashada 2021-22 marka la eego, musharraxiinta kursi kasta oo Golaha Shacabka ah waxaa u codeeyay 101 ergo, kuwaasoo ay soo xuleen guddi ka kooban 5 xubnood, 3 kamid ah ayaa ahaa odayaal kasoo jeeda beesha kursiga loo qoondeeyay. Casharkii laga bartay habkan ayaa ah ballaarinta masuuliyiinta beelaha ee ka qeybqaadanaya hannaanka doorashada dadban, marka la barbardhigo geeddi-socodkii 2012 iyo 2016, in ay keentay jahawareer ku saabsan sharciyadda odayaasha ee qabiilo gaar ah ama jufooyin gaar ah. Waxay kaloo kordhisay baaxadda faragelinta siyaasadeed ee geeddi-socodka.

Sanadkii 2012-kii liiska 135 'oday dhaqameed' ayaa loo xilsaaray inay soo magacaabaan 275 Xildhibaan ee Golaha Shacabka. Inkastoo ay xaddidneyd sidoo kalena khaladaad badan ka jiray, haddana soo xulista 135-ta oday waxaa lagu saleeyay hannaanka 4.5 si weyn ayaana loo aqbalay xilligaas. Sanadkii 2016, 135-tii oday dhaqameed oo xubno kooban laga beddelay maadaama qaar kamid ah ay dhinteen ayaa loo xilsaaray inay soo xulaan 51 ergo oo doortay mid kamid ah musharraxiinta kursi kasta ee Golaha Shacabka.

'135-ta oday' ayaa laga tagay doorashadii 2021/22, waxaana la kordhiyey tirada ergada dooraneysay xildhibaannada oo laga dhigay 101 ergo kursigiiba. Sida ku cad heshiis la gaarey Ogosto 2021, ergada waxaa soo xulayay 'guddiga xulista ergada' oo ka kooban ugu yaraan saddex 'oday' iyo labo xubnood oo katirsan 'bulshda rayidka' oo kasoo jeeda beesha kursiga. Markii ay billaabatay hannaankii doorashada Golaha Shacabka bishii Nofeembar 2021, lama shaacin guddiyada xulista ergada, waxaana muddadaas la doortay 24 xildhibaan — oo lagu kala doortay Galmudug, Soomaaliland (oo Muqdisho lagu doortay), iyo Koonfur Galbeed. Kadib shirkii Golaha Wadatashiga Qaran ee bishii Janaayo ee u dhexeeyay Ra'iisul Wasaaraha, Madaxweynayaasha Dowlad-Goboleedyada, iyo Duqa Muqdisho, guddiyada hirgelinta doorashooyinka ee heer dowlad-goboleed waxaa la faray inay daabacaan liiska guddiga xulista ergada, si hufnaan loo helo. Sikastaba ha ahaatee, inkastoo warqadaha lagu magacaabayay guddiyada xulista ergada ay saxeexayeen guddoomiyeyaasha guddiyada hirgelinta doorashooyinka ee heer dowlad-goboleed, haddana marna ma caddeyn cidda ka masuulka ah xulista xubnaha guddiga, ama shuruudaha lagusoo xulay.

Aqoonsiga heerka odayada iyo u qalmida in ay beelaha ku metelaan doorashooyinka ayaa sidoo kale loo wareejiyay guddiyada hirgelinta doorashooyinka ee heer dowlad-goboleed, taasoo sii xoojisay in madaxda Dowlad-goboleedyada ay magacaabaan xubno daacad u ah. In ka badan 630 oday ayaa xubno ka noqday guddiyada soo xulista ergada, kuwaasoo 10 (≈1.6 boqolkiiba) ay kamid ahaayeen '135-tii oday' ee ka qeyb qaadatay

3. Dhammaadkii Maarso 2022, Guddiga Xallinta Khilaafaadka Doorashada waxa uu shaaciyey liis shan kiis oo kale ah kuwaasoo ama la joojiyay baaritaan la'aan, loona arkay kuwo aan sax ahayn, ama cabasho lagasoo gudbiyey.

doorashooyinkii 2012 iyo 2016.[4] Qeexidda, doorka, iyo mansabka xubnaha loo tixgelinayo odayaal beel aad bay ugu kala duwan yihiin beelaha iyo gobollada. Heerar kala duwan ayaa ka dhex jira oo odayaasha u kala sooca kuwa metela qabiillada oo dhan, kuwa metela heerka ugu hooseeya ee jufada qabiilka iyo koox diyada bixisa. Inta badan 630-ka oday ee kamid ahaa guddiyada soo xulista ergada ayaa lagu qeexay nabadoonno, ereygaas oo taariikh ahaan loo adeegsado in lagu qeexo heerka ugu hooseeya ee odayaasha. In ay nabadooonnadan qeyb ka noqdaan geeddi-socodka, si ka duwan liiskii hore ee 135-ta oday oo xilal sare kasoo qabtay beelaha dhexdooda, ayaa abuurtay fursad ballaaran ee nabadoonnada lagusoo xulo, balse waxay hoos u dhigtay sharciyaddooda sida lagu doodi karo. In wakiillo ka socda 'bulshada rayidka' lagu daro guddiyada xulashada ergada, iyadoo aan si cad loo qeexin yaa bulsho rayid ah, ayaa fursad ballaaran oo lagusoo xulo xubnahaas sidoo kale abuurtay.[5]

Platform-ka waxa uu ogaaday marar badan oo doorka odayaasha dhaqanka si weyn loogu muransanaa. Marar badan ayaa beeluhu ku doodeen in odayaasha ugu jira guddiga xulista ergada ee kursigooda aanay ahayn kuwo sharci ah, waxaana muuqatay in xubno saameyn siyaasadeed ku lahaa ay awood u yeesheen inay soo xulaan 'odayaal' danahooda ka shaqeeya. Xaaladaha qaarkood, odayaashii loo arkayay inay maamullada kasoo horjeedaan ayaa laga maroorsaday awoodda kahor inta aanay doorashadu dhicin. Waxaa kaloo jiray kiisas madaxda Dowlad-goboleedyada ay heshiisyo la galeen odayaasha si ay saameyn ugu yeeshaan natiijada doorashada. Guddiyada soo xulista ergada ee lagu daray habraaca doorashada ayaa fursad weyn u siisay madaxda in ay soo magacaabaan shaqsiyaad iyaga u xaglinaya, iyagoo sidoo kale xaddidey la xisaabtanka beelaha. Natiijo ahaan, iyadoo ballaarinta shakhsiyaadka u qalma in ay kamid noqdaan ergada loo arki karo in uu geeddi-socodka ka dhigayo mid loo dhan yahay, waxay sidoo kale fursado waaweyn u abuurtay siyaasiytiinta oo si iyaga u xagnileysa u isticmaalay.

## 2.7 Daahfurnaan la'aanta xulista iyo maamulka ergada ayaa horseedday in la hareer maro ama loo arko in la hareer maray habraacii

Maadaama tirada ergada kursi kasta oo kamid ah 275-ta kursi ee Golaha Shacabka oo ahaa 51 la gaarsiiyay 101, doorashada 2021-22 waxay labo jibaartay tirada dadka dhiibtay codadka marka loo eego doorashadii 2016. In ergada ay ka qeyb qaataan doorashada dhowr kursi ayaa la micno ah in tirada dadka codeeyay ay shaki la'aan ka yaraayeen intii la qorsheeyay. Sidoo kale, magacaabistooda ayaa lagu sifeeyay daahfurnaan la'aan. Intaa waxaa dheer, nooca doorashooyinka waxay muujiyeen in kordhinta tirada ergooyinka aanay hoos u dhigeynin heerarka iibsashada codadka, taa cagsigeedana waxaa kordhay tirada dadka filayay in lacag la siiyo.

Sawirro la qaaday intii ay doorashadu socotay oo lagu faafiyay boggaga guddiyada doorashada ee heer dowlad-goboleed ay ku leeyihiin baraha bulshada ayaa muujinaya rag iyo dumar da'doodu kala duwan tahay oo ergo ahaan loo diwaangeliyay, oo ay ku jiraan qaar u muuqday in ay da'doodu ka yar tahay da'da codbixinta. Si lamid ah doorashadii 2016-kii, lama shaacin magacyada ergada, waxaana la dhihi karaa walaaca amni ayaa sabab u ahaa. Guddiyada doorashada heer dowlad-goboleed iyo ciidamada ammaanka ee Dowlad-goboleedyada waxaa looga baahnaa inay kala shaandheeyaan dhammaan ergada, si ay u xaqiijiyaan in ergada aysan xiriir la lahayn kooxaha xagjirka ah iyo haddii ay leeyihiin diiwaan dambi. Sikastaba ha ahaatee,

4. Sikastaba ha ahaatee, in ka badan 40 xubnood ayaa laga yaabaa in 'loo isticmaalay' 2 ilaa 3 guddi kala duwan ee xulashada ergada.

5. Habraaca Guddiga Heer Federaal ee Hirgelinta Doorashooyinka ee lagasoo billaabo bishii Ogosto 2021 waxa uu adeegsanayay tixcaaca shakhsiyaad 'sida aqoonyahanno, ganacsato, macallimiin, dhakhaatiir, howlwadeennada gargaarka bini'aadamnimo iyo dadka baahiyaha gaarka ah qaba'.

Soomaaliya marka la joogo helitaanka iyo saxnaanta nidaamyada isdhaafsiga xogta, si loo hubiyo diiwaannada noocaas ah, aad bay u xaddidan tahay. Intaa waxaa dheer, eedeymaha ah in ergada ha kursi dharka laga beddelo oo ay u codeeyaan dhowr kursi waxaa muujiyey sawirro ay baraha bulshada soo geliyeen guddiyada doorashooyinka ee heer dowlad-goboleed. Ilo-wareedyo si toos ah ugu lug lahaa howlaha doorashada ayaa qiray in inta lagu guda jiray tartanka kuraasta jufooyinkooda ay ugu yaraan ergooyinka qaar dharka iska beddeleen, islamarkaana lacago ku qaateen kursi kasta oo ay u codeeyeen.

## 2.8 Inta badan natiijooyinka doorashada xildhibaannada ayaa lasii go'aamiyey, taasoo xaddiday tartanka furan

Wajiga ugu dambeeyay ee hannaanka doorashada Golaha Shacabka waxaa uu ku sifeysnaa dadaal loo ekeysiinayo tartan furan oo kuraas badan ah, kuwaasoo inta badan ku guuldareystay in ay ka duwanaadaan natiijadii horey loosii go'aamiyay. Cashar muhiim ah ayaa ah in hannaankii doorashooyinka ee dabada dheeraaday ay guud ahaan abuureen fursado wax-is-daba-marin baaxad weyn. Doorashadu waxay u dhacday si goos-goos ah muddadii u dhexeysay Nofeembar 2021 iyo Abriil 2022. Goosgooskan ayaa u sahlay dhammaan jilayaasha siyaasadda — hoggaanka dowladda federaalka iyo dowlad-goboleedyada iyo musharraxiinta madaxweynanimada iyo xildhiibaanimada — in ay geeddi-socodka ula socdaan si tartiib ah, waxna ka bartaan guullaha iyo guul darrooyinka, iyo in si qorsheysan u qaabeystaan tartamada xiga. Faragelin siyaasadeed ayaa qeyb weyn ka qaadatay go'aaminta natiijada kuraasta intooda badan. Goobta labaad ee codbixinta ee Dowlad-goboleedyada ayaa meelaha qaar ka abuurtay fursado tartan furan, taas caksigeeda waxa ay hannaan kala qeybsanaan ka abuurtay goobo kale taasoo horseedday xasilooni darro. Wakhtiga doorashada dabada dheeraatay ayaa sidoo kale tijaabiyey dulqaadka saaxiibbada caalamka ee bixinayay dhaqaalaha lagu taageerayey geeddi-socodka iyagoo aad u doonayay in lasoo gunaanado. Nasiib darro, samir la'aanta saaxiibbada caalamka ee muddada doorashadu ay socotay ayaa sidoo kale kordhisay dulqaadkooda xeeladaha kursi boobka ah iyo guul-darrada in la xaqiijiyo qoondada 30 boqolkiiba ee haweenka.

Falanqeynta xogta la heli karo ee natiijada doorashada ayaa si cad u muujineysa in tartanka uu ahaa mid aad u xaddidan iyadoona aan lagu tartamin inta badan kuraasta. Dhowr jeer ayay cabashooyin sameeyeen shaqsiyaad ay ku jiraan masuuliyiin xil haya oo laga hor istaagay in ay isu diwaangeliyaan musharraxnimada iyadoo la sheegay in qaarkood loo diiday in ay u safraan goobta doorashada markii la bilaabayay diiwaangelinta. Kuraas lagu qiyaasay 94% ayaa waxaa midweliba ku tartamay labo musharrax oo keliya, waxaana ugu yaraan 83 kamid ah 238-ka kursi oo ay ku tartamayeen 2 qof oo keliya uu musharrax kamid ah tanaasulay kahor inta aan codeyntu billaaban, inkastoo loo badinayo inuu bixiyay lacagta diiwaangelinta. Tani waxa ay ka dhigan tahay in ku dhawaad saddex meelood meel kuraasta aan lagu tartamin. Istaraatiijiyaddan ayaa aad looga adeegsadey doorashadii kuraasta Soomaaliland oo ku dhawaad 70 boqolkiiba kuraasta lagu guuleystay kadib markii uu tanaasulay musharraxa labaad. Sidoo kale, tirada ay ku kala badinayeen labada musharrax ayaa ahayd mid aad u kala sarreysay, taasoo muujineysa in natiijada horey loogu heshiiyay. 117-ka kursi ee ay midweliba ku tartamayeen labo musharax, xog waafi ahna laga helay, ayay guuleystayaashu heleen celcelis ahaan boqolkiiba 82.9 codadkii la dhiibtay, waxa ayna 24 kursi lagu guuleystay codad dhan 90 boqolkiiba iyo ka badan. Celcelis ahaan xaddiga guusha ee 194-ka kursi oo xog waafi ah laga helay ayaa ahayd 86.7%, iyadoo ugu yaraan 71 murashax ay ku guuleysteen in ka badan 96 boqolkiiba codadka, halka 36 murashax ay ku guuleysteen 100-kiiba boqolkiiba. Hal sabab oo lagu macneeyay heerka sarreeya ee tanaasulka musharraxiinta iyo xaddiga guusha ee kuraas badan oo sarreeyay ayaa ah adeegsiga baahsan ee musharraxiinta malxiisyada ah, oo ahaa dhaqan la isticmaalay xilligii

doorashadii 2016/17, taasoo mar kale loo isticmaalay doorashadii Aqalka Sare ee 2021, kadibna doorashada Golaha Shacabka.

Cashar kale oo muhiim ah oo laga bartay hirgelinta geeddi-socodka doorashada ayaa ahaa baahida loo qabo in la helo qaab nidaamsan oo ay guddiyada doorashada heer federal iyo heer dowlad-gobholeed u faafiyaan macluumaadka doorashada iyo natiijooyinka. Siyaabaha kala duwan ee natiijooyinka loo baahiyey ayaa ka tarjumaya khaladaad ka jira nidaamka ee guddiyada hirgelinta doorashada ee heer dowlad-goboleed dhexdooda iyo xitaa kuraas kala duwan oo lagu doortay hal deegaan doorasho hal maalin. Natiijooyinka, oo ay ku jiraan tirada codadka la dhiibtay, tirada codadka ay heleen guuleysteyaasha, iyo tirada codadka hallaabay, ayaa la sheegay keliya 70.5 boqolkiiba 275-ta kursi, halka 22.5 boqolkiiba kuraasta, keliya magaca guuleystaha lagu dhawaaqay waxaana 6.5 boqolkiiba kuraasta la sheegay keliya tirada codadka uu helay guuleystaha.

## 2.9 Kuraas xaddidan ayaa lagu tartamay

Iyadoo natiijada codadka ergada horey loogu go'aamiyeen faragelin siyaasadeed oo lagu sameeyay inta badan kuraasta, waxaa kaloo jirtay in ilaa 16 kursi lagu tartamay: 11 kursi oo Hirshabeelle ah, 3 Galmudug ah iyo 2 kursi oo Somaliland ah oo lagu doortay magaalada Muqdisho. Kuraastaan ayaa waxaa ku tartamay ugu yaraan labo musharrax, waxaana lagu kala badiyay codad yar, waxaana codeynta ay u gudubtay wareeg labaad ama mararka qaar wareeg saddexaad. Dhowr arrimood ayaa gacan ka geystay tartankan furan:

- Xildhibanadii xilka hayay oo lumiyey kalsoonida beeshooda, waxaana guddiyadii soo xulayay ergada ay kuraasta u fureen musharraxiin bedeli karta.
- Kuraasta qaar ayaa loo arkayay kuwa mudnaan siyaasadeed u leh maamulka talada haya, madaxda Dowlad-goboleedyada iyo mucaaradka, taasoo ka dhigtay mid aad u adag in loo xero hal musharax.
- Beelaha qaar ayaa ku heshiin waayay hal musharrax oo beddela qofka xilka hayay, sidaas awgeed waxaa loo furay tartan.
- Midda ugu muhiimsan, rabitaanka iyo awoodda beello gaar ah u leeyihiin in ay ciidan hubeysan ku abaabulaan goobaha codbixinta qaarkood (sida: Hirshabeelle iyo Galmudug) ayaa abuurtay tartan.

Labada Dowlad-goboleed ee kor ku xusan, in lagu darro goob doorasho labaad, Beledweyne iyo Gaalkacyo, waxay u oggolaatay in tartan furan uu ka dhoco kuraasta beelo kasoo horjeeday hoggaanka dowlad-goboleedka oo abaabulay ciidamo hab qabiil u hubeysan. Magaalada Beledweyne, inkastoo beesha ugu badan dadka deegaanka ay awood u yeelatay in ay ka hor istaagto maamulka Dowlad-goboleedka inuu saameyn ku yeesho doorashada, taasi ma aysan hor istaagin rabshado, waxaana Al-Shabaab qarax ismiidaamin ah ay bishii Maarso 2022 la beegsadeen kuna dileen xilligii ololaheeda xildhibaanad Aamina Maxamed Cabdi.[6]

6. Iyadoo mucaarad ku ahayd dowladda Farmaajo, Cabdi ayaa kahor dhimashadeeda ku eedeeysay masuuliyiinta inay isku dayayeen inay ka horjoogsadaan inay u tartanto xubinnimada baarlamaanka, sababtuna waxay tahay qeyb ahaan waxa ay ku baaqday in baaritaan lagu sameeyo dilka haweeney ka tirsanayd NISA oo la waayay bishii Juun 2021, taasoo dhalisay muran badan.

## 2.10 Xaaladda oo aad loo siyaasadeeyay darteed, metelaadda haweenka ayaanan mudnaan la siin

Doorashada Aqalka Sare, musharraxiin haween ah ayaa loo doortay 14 kamid ah 54-ta kursi (oo ah 26 boqolkiiba), hal kursi ayaa ku kordhay metelaadda haweenka Aqalka Sare ee doorashadii 2016.[7] Sikastaba ha ahaatee, Golaha Shacabka, keliya 54 kursi oo kamid ah 275-ta kursi ayay haweenku heleen (waana 19.6 boqolkiiba), taasoo aad uga hooseeysa tii 2016 (24.4%) waxa ayna ka hooseeyeen qoondadii 30 boqolkiiba ahayd ee ay riixayeen beesha caalamka oo taageerayey geeddi-socodkan, ayna ku heshiiyeen siyaasiyiinta Soomaalida ee xilka haya. Sikastaba ha ahaatee, waxaa xusid mudan in doorashada dadban (oo leh qoondo haween) uu soo saartay xildhibaanno dumar ah oo ka badan doorashadii tooska ahayd ee Soomaaliland ka dhacday, maadaama aan haween loo dooran Aqalka Wakiillada doorashadii May 2021.

Habraacyo loo dejiyay in lagu kordhiyo ka qeybgalka haweenka iyo metelaaddooda ayaa waxaa ka faa'ideystay siyaasiyiin. Tusaale ahaan, qodobbada lagu dhimayo kharashka musharraxiinta haweenka ah ayaa la sheegay in loo isticmaalay in lagu dhimo kharashaadka tartanka doorashooyinka natiijooyinkooda horay loo sii go'aamiyay oo ay qeybta ka yihiin musharraxiinta malxiiska ah. Tani waxa ay ka dhacday doorashooyinkii Aqalka Sare iyo Golaha Shacabka labaduba, oo haween badan oo musharaxiin ah lagusoo daray musharraxiinta malxiiska ah ama boos-heynta ah. Istaraatiijiyaddani waxa ay hoos u dhigtay kharashka diiwaangelinta malxiisyada, maadaama kharashka is-diiwaangelinta dumarka (Golaha Shacabka) uu ahaa USD 10,000 marka la barbardhigo USD 20,000 oo ragga laga rabay. Waxa sidoo kale aad u yaraa filashada ah in dumarka malxiiska ah ay tanaasuli waayaan oo ay doorashada guda galaan. Ka faa'iidaysigan ee habkii loogu talo galay in lagu kordhiyo metelaadda haweenka ayaa hoos u dhigtay kharashaadka doorashada.

Doorashada Madaxweynaha (oo hoos lagu falanqeeyay) khidmadda diiwaangelinta musharraxiinta oo ahayd USD 40,000 waxaa suuragal ah in ay yareysay tartamayaasha dumarka ah maadaama hal qof oo dumar ah, Fowsiya Yuusuf Aadam, ay tartantay. Tani waxa ay muujinaysaa baahida loo qabo in la raadiyo habab lagu kordhinayo tirada haweenka u sharraxan madaxweynaha, iyadoo la garwaaqsanayo in tallaabooyinkan oo kale ay keeni karaan natiijoyin aan lagu talagelin oo suurtagelinaya qaabab cusub oo wax isdaba-marin ah, sida ka muuqatay doorashadii Baarlamaanka.

## 2.11 Doorashada Madaxweynaha ayaa aad loogu tartamay, balse cod-iibsaga ayaa saameyn ku lahayd natiijada

Inta badan maalgelinta siyaasadeed iyo midda maaliyadeed ee madaxda dowladda federaalka iyo kuwa Dowlad-goboleedyada ee loollankooda doorashada baarlamaanka ee 2021/22 waxa ay la xiriirtay rabitaankooda ah in ay saameyn ku yeeshaan natiijada ugu dambeysa oo ah doorashada madaxweynaha Soomaaliya. Cashar muhiim ah ayaa ah in nidaamka doorashada dadban qudhiisa uu lama huraan ka dhigayo in jilayaasha siyaasadda ay bilowga hore diiradda saaraan 'dhamaadka doorashada' oo ah doorashada madaxweynaha. Waxaa la dhihi karaa, tani waxa ay kuwa ku tartamaya kuraasta baarlamaanka kasii fogeyneysaa arrimaha gudaha iyo metelaadda beelahooda/deegaanno gaar ah. Inkastoo Soomaaliya tahay dowlad federaal ah, haddana madaxtooyada Muqdisho ayaa weli leh awood muuqata waana abaalmarinta siyaasadeed ee ugu weyn. Maqnaanshaha kala

7. Saferworld (2017) 'Somalia's 2016 Electoral Process Preliminary report of the Domestic Election Observer Mission' https://www.saferworld.org.uk/downloads/somalias-2016-electoral-process---deom-report-final.pdf

caddeynta dastuurka ee dakhli wadaagga dowladda federaalka iyo Dowlad-goboleedyada ayaa ugasii dareyso dhibaatadaan. Marka la eego doorashada dadban ee Madaxweynaha, labo cashar ayaa laga tilmaami karaa: kow, waxaa loo baahan yahay shuruuc iyo xeerar ku saabsan maalgelinta ololaha doorashada; madda labaadna, waa in la ogaado daahfurnaanta ilaha ay ka yimaadaan maalgelinta ololaha doorashada iyo sida loo isticmaalo.

15-kii May, xildhibaanno ayaa isugu yimid Xerada Afisyooni ee garoonka diyaaradaha Muqdisho si ay u doortaan madaxweynaha xiga. Natiijadii kasoo baxday doorasha waxay ahayd in uu ku guuleystay madaxweynihii hore Xasan Sheekh Maxamuud. Inkastoo siyaasiyiin kala duwani ay wax-is-daba-marin sameeyeen muddaddii ay socotay doorashooyinkii baarlamaanka, doorashada madaxweynaha waxa ay noqotay mid aad loogu tartamay. 36-da musharrax ee u tartamay xilka madaxweynaha, waxa ay diiradda saarneyd madaxweynaha xilka hayay iyo lix tartame oo kale oo miisaan culus ku leh siyaasadda, oo ay ku jiraan madaxweynayaashii hore ee Xasan Sheekh iyo Sheekh Shariif, Madaxweynaha Puntland, Siciid Cabdullaahi Deni, Ra'iisul Wasaarihii hore, Xasan Cali Kheyre, iyo hoggaamiyeyaasha mucaaradka Cabdiraxmaan Cabdishakuur iyo Cabdulqaadir Cosoble. Inkastoo la sheegay in lacag badan ay bixiyeen musharraxiinta loollanka ku jiray, haddana lacag bixin keliya ma ahayn mid codad lagu helo. Wareegii labaad ee doorashada waxaa usoo gudbay afar musharax oo keliya oo kala ahaa Xasan Sheekh, Farmaajo, Deni iyo Kheyre. Xasan Sheekh ayaa wareegii labaad helay 110 cod, Farmaajo ayaa helay 83 cod, Deni ayaa helay 68, Kheyre ayaa helay 63. Wareegii saddexaad ee ugu dambeeyay Xasan Sheekh ayaa ku guuleystay taageerada Deni, isagoo helay 214 cod halka Farmaajo uu helay 110 cod. Arrinta loo arkayey in ay muhiim u ahayd guushii Xasan Sheekh ayaa ahayd in uu awood u yeeshay in uu isku keeno koox olole xooggan sameysay (oo ay ku jireen kuwa siyaasadda saameyn weyn ku leh oo baarlamaanka ku jira) kuwaasoo awood u yeeshay in ay isbaheysi la sameystaan guud ahaan xoogagga siyaasadda. Inkastoo dhammaan musharraxiinta ay lacago bixiyeen si ay saameyn ugu yeeshaan natiijada, oo ay ku jiraan lacago laga keenay dibadda, ma jiro xiriir cad oo muujinaya sida lacag bixintu u saameysay natiijada doorashada.

Sikastaba ha ahaatee, arrinta ku saabsan isticmaalka lacagaha ee habraacyada doorashada ayaa mudan in wax laga tilmaamo. Inkastoo ay Qolka Lasocodka Xaaladda Doorashadu warbixin hordhac ah oo ay kasoo saareen doorashadii Madaxtooyada ay ku sheegeen in si nabad iyo hufnaan ku jirto ay u qabsoontay,[8] waxa kale oo ay xuseen in aanay jirin habraacyo lagu maamulo lacagaha ololaha iyo in aanay jirin ilaalin ku filan iyo hufnaan la xiriirta lacagaha ololaha iyo ilaha dhaqaalaha. Sidoo kale, waxa ay tilmaameen in weriyeyaasha xarumaha warbaahinta gaarka loo leeyahay loo diiday inay galaan goobta doorashada, taasoo xadiday xuquuqda ay u leeyihiin in ay si xor ah uga warbixiyaan arrin muhiim u ah bulshada. Ugu dambeyntii, in Madaxweyne Farmaajo uu aqbalay guusha Xasan Sheekh ayaa ka dhigan in uu dhammaaday geeddi-socodkii daba dheeraaday iyo khilaafkii. Marka la eego qalalaasaha siyaasadeed ee dalka ka dhacay intii uu socday geeddi-socodkan, way adag tahay in lagu tilmaamo xukun wareejin si nabad ah ku dhacday. Sikastaba ha ahaatee, aqbalaadda Farmaajo in laga guuleystay ayaa keentay in khatarta khilaafka ay si weyn hoos ugu dhacdo iyo in xiisaddii ay degto.

8. Qolka Lasocodka Xaaladda Doorashada waa koox la socod ee arrimaha doorashada oo ay aasaaseen dallada jilayaasha aan dowliga ahayn ee Puntland (PUNSAA) iyo dalladda jilayaasha aan dowliga ahayn ee Soomaaliya (SONSA). Waxa taageeray Machadka Doorashooyinka Waarta ee Afrika (EISA).

## 2.12 Aragtida dadweynaha ee hannaanka doorashada waxa ay ahayd mid taban waxa ayna dareemeen inay saameyn taban ku yeelatay bulshada

Aragti ahaan, ilaa 27,775 muwaadiniin Soomaali ah ayaa ka qeyb qaatay doorashada xildhibaanda Golaha Shacabka ee doorashada dadban ee 2021/22. Inkastoo tirada dhabta ah ee ka qeyb galayaasha aan la xaqiijin karin oo ay u badan tahay in ay ka hooseeyeen ergada qaar oo dhowr kursi u codeysay awgeed, waxa ay u badan tahay in tirada Soomaalida ee ka qeyb gashay ay ka badnaayeen ku dhawaad 14,000-kii qof oo ka qeyb qaatay doorashooyinkii 2016. Xitaa haddii 27,775 ay ka qeyb qaateen doorashadii 2021/22, tani waxay noqonaysaa qiyaastii 0.17 boqolkiiba Soomaalida.[9] Aragtida dadweynaha ee sharciyadda geeddi-socodka doorashooyinkii dadbanaa ayaa muhiim ah in la tixgeliyo. Marka la eego xogta hoos ku xusan, waxa lagu doodi karaa in hannaanka doorashada 2021-22 uusan faa’iido u yeelan muwaadiniinta caadiga ah, waxa ayna dad badan dareemeen in doorashadu shidaal ku shubtay colaado, islamarkaana ay indhaha dowladda ka jeedisay arrimo kale oo muhiim ah.

Sahan qaran ama ra’yi ururin ballaaran oo aan jirin awgeed, xogta ku saabsan aragtida muwaadiniiinta ee arrimaha siyaasadda way adag tahay in si nidaamsan loo uruuriyo. Iyagoo la kaashanayo Platform-ka, Africa’s Voices Foundation (AVF) ayaa hirgelisay mashruuc 3 bilood ah intii u dhexeysay Febraayo iyo May 2022 si ay u baahiso barnaamjiyo ka baxay 30 idaacadood oo ku kala yaalla 6 Dowlad-goboleed, si kor loogu qaado aragtida dadweynaha ee ku saabsan doorashooyinka baarlamaanka ee socday iyo soo uruurinta aragtida muwaadiniinta.[10] Lixda barnaamij ee ka baxay idaacadaha waxaa ka mid ahaa ogeysiisyo adeeg dadweyne, riwaayad, wareysiyo lala yeeshay khubarada doorashada iyo fariimo. 14,773 qof ayaa soo diray fariimo jawaab celin ah iyo jawaabo ku aadan su’aalo toddobaadle ah oo barnaamijka lagusoo bandhigay kuna saabsanaa doorashooyinka socday.[11]

Iyagoo ka jawaabaya su’aashii u horeeysay ee barnaamijkii ka hadlayay in doorashadu saameyn ku yeelatay nolosha dadka, dad badan oo ka qayb galay waxa ay muujiyeen dareen ah in doorashadu qeyb ka qaadatay sicir bararka iyo sare-u-kaca maciishadda. Dadka la wareystay ayaa sidoo kale sheegay in doorashadu ay diiradda ka weecisay abaarta jirtay, halka qaar kalena ay sheegeen in ay sabab u noqotay shaqo la’aan. Toddobaadkii labaad, ka qeyb galayaasha badankooda (qiyaastii 60 boqolkiiba) ayaa sheegeen in doorashadu horseedday isku dhac iyo dhiig daata. Marka la eego qaabka ay doorashadu u dhacday, in badan oo kamid ah ka qeyb galayaasha waxay sheegeen in doorashada aysan ahayn mid ‘xor iyo xalaal’ ah, markii wax laga weydiiyay doorashooyinka mustaqbalka, jawaabaha waxay muujiyeen rabitaan baahsan oo ah in loo baahan yahay doorasho tayo sare leh. Mar la weydiiyay in gaaridda qof iyo cod ee doorashooyinka soo socda ay tahay mudnaanta koowaad ee bulshadooda, in ka badan kala bar dadka la wareystay waxay yiraahdeen ‘haa’, iyadoo qaar kamid ah ay sheegeen in ay dareemeen in ay doorasho toos ah dhiirigelinayso, fursadna u siinayso inay doortaan hoggaamiyeyaal wanaagsan, lagana yaabo in ay yareyso qabyaaladda.

9. Iyadoo lagasoo aqaadayo inay ergo gaareysa 27,775 codeysay; iyo in lagu qiyaasay dadka Soomaaliya ku nool sanadka 2022 ay yihiin 16,794045 oo qof (https://www.worldometers.info/world-population/somalia-population/)

10. Jawaabaha ka qeyb galayaasha kama hadlin doorashada Madaxweynaha, keliya waxa ay ka hadleen doorashooyinka Golaha Shacabka iyo Aqalka Sare.

11. Xogtan waxaa lagasoo qaatay dad ka qeyb galay oo iskood u go’aansaday in ay jawaab bixiyaan oo qeyb ka ahaa barnaamijyada iyadoo lagu saleeyay arrimo badan sida lahaanshaha taleefanka, isticmaalka warbaahinta, akhris-qoraalka, iyo jinsiga. Aragtiyada dadka aan awood u lahayn inay raadiyaha dhageystaan ayaa laga yaabaa inaan halkan lagusoo darin. 59.8 boqolkiiba kuwa qeybta ka ahaa xog uruurinta waxay da’doodu u dhexeysay 18 - 35 sano; dadka ugu yar ee aragtidooda la ogaaday ayaa da'doodu u dhexaysay 55-99 sano (2.9 boqolkiiba). 63.9 boqolkiiba jawaab bixiyeyaasha waxay ahaayeen rag, iyadoo 36.1 boqolkiiba dumar ahaayeen. 49.7 boqolkiiba ayaa sheegay inay dhawaan barakaceen.

Marka lagasoo tago xogta raadiyaha/SMS ee AVF, Platform-ku waxa uu sidoo kale taageeray shirar wadatashi ah oo ay PDRC ka sameysay Puntland, iyo doodo ay SONSA ka qabatay magaalooyinka waaweyn ee Dowlad-goboleedyada. Doodahan waxaa ka qeyb qaatay ilaa 150 qof oo isugu jira wakiillo ka socday bulshada rayidka ah, haweenka iyo dhalinyarada, aqoonyahanno, ganacsato, odayaal iyo siyaasiyiin. Aragtiyada lagu wadaagay doodahani waxa ay macluumaad ku biiriyeen falanqeynta Platform-ka ee hannaanka doorashada ee lagusoo koobay warbixintan. Ku dhawaad dhammaan ka qeyb galayaashu waxa ay u arkeen in hannaanka doorashada 2021/22 uu ahaa mid khaladaad, wax-is-daba marin iyo xasilooni darro badan lahaa marka loo eego doorashooyinkii 2016-ka dhacay. Aragtida ah rajada laga qabo in mudnaanta la siiyo doorashooyin qof iyo cod ah sanadka 2026 ayaa aad loogu kala aragti duwanaa. Qaar kamid ah ka qeyb galayaasha ayaa sheegay in qorsheynta doorashooyin qof iyo cod ah loo baahan yahay in la billaabo bilowga muddo xilleedka madaxweynaha iyo baarlamaanka cusub haddii rajo laga leeyahay in ay doorasho toos ah suurtagal noqoto. Ka qeyb galayaal kale ayaa sheegay in ay tahay in xoogga la saaro qabashada doorashooyinka heer degmo ee qof iyo cod ah si ay u noqoto tillaabo doorashada mustaqbalka loo qaadayo iyadoo wax lagu dhisayo tijaabadii hordhaca ahayd ee doorashadii tooska ahayd ee degmooyinka Puntland 2021.

# 3. Gunaanad

Waxaa la wada ogsoon yahay in hannaanka looga heshiiyey nooca doorashada dadban ee 2021/22 uu ahaa mid aad u liita, iyadoo hirgelinta doorashaduna ay aad u khaldaneyd, taasoo ay sabab u tahay faragelin siyaasadeed oo heer federaal iyo heer dowlad-goboleedba ah. Heshiiskii ku saabsanaa nidaam doorasho loo wada dhan yahay ayaa ahaa caqabad siyaasadeed waxaana kooxaha kala duwan ay si cad u adeegsadeen golayaal kala duwan iyo xeelado sharci-dejineed oo carqaladeynaya, si ay u horumariyaan danahooda. Kadib ugu dambeyntii markii la xaqiijiyay hannaanka doorashada, kordhinta 'odayaal dhaqameedyada' ka qeybgalaya doorashooyinka dadban oo la ballaariyey ayaa keentay in ay doorashada qeyb ka noqdaan odayaal ka sharciyad iyo aqbalaad yar '135-tii oday dhaqameed' marka loo eego qabiilada. Tani waxay sidoo kale kordhisay baaxadda wax-is-daba-marineed, oo ay la socoto daba-dheeraashaha doorashada, gaar ahaan Golaha Shacabka. Dadaalka lagu kordhinayay ka qeybgalka haweenka iyo metelaaddooda ayaa lagu guuldarreystay in la gaaro qoondada boqolkiiba 30 ee lagu heshiiyey waxaana ka faa'ideystay siyaasiyiin ujeeddooyin siyaasadeed oo u gaar ah leh. Ugu dambeyntii, nidaamka doorashada dadban ayaa u horseedaya jilayaasha siyaasadda in ay bilowga doorashada diiradda saaraan hadafka ugu dambeya ee saameynta doorashada Madaxweynaha. Marka lagu daro arrimaha aan kor kusoo xusnay ee wax isdaba marinta, tani waxa ay keeneysaa in tartanka kuraasta baarlamaanka laga fogeeyo arrimaha deegaanno iyo beelo gaar ah iyo cidda ay ahayd in kuraastaasi ay metelaan ama ku tartamaan. Waxaa muhiim ah in la ogaado in mar kale xisbiyada siyaasaddu aysan door rasmi ah ka ciyaarin geedi socodka.

Casharrada halkan lagusoo bandhigay waxaa looga gol leeyahay in lagu billlaabo aragtiyo iyo dib u milicsi xog iyo aqoon ku saleysan ee ku saabsan sida loo yareyn karo khilaafyada siyaasadeed iyo ceebaha habraaca doorasho marka la gaaro doorashada xigta, iyadoo loo marayo qaab ka baxsan doodda ah in la qabanaayo doorasho qof iyo cod ah, ama nooca doorasho ee ku habboon Soomaaliya. Tani waxa ay ku lug yeelan kartaa nidaam furfuran oo xoojinaya ama dhisaya hay'adaha (sida xisbiyada) lagama-maarmaanka u ah awood-siinta iyo metelaadda siyaasadeed. Halkii hay'adahan loo arki lahaa shuruudo loogu talagalay nooc gaar ah oo xuquuq cod bixin ah (sida doorasho qof iyo cod ah), waa in la tixgeliyaa sida ay usoo saari karaan faa'idooyin, ha ahaato nidaam doorasho dadban oo la hormariyey ama doorasho qof iyo cod ah, haddii nidaamka dambe uu u muuqdo mid macquul ah afarta sano ee soo socota. Sikastaba ha noqotee, waxa ugu muhiimsan ee looga fogaan karo caqabadihii doorashadii hore ayaa noqon doontaa wada-hadal iyo iskaashi xilli hore la billaabo loona dhan yahay oo ay Soomaali badan isugu yimaadaan si ay u xalliyaan arrimahan.

## Xuquuq

Warbixintan waxaa soo saaray Somali Dialogue Platform. Somali Dialogue Platform waa barnaamij Soomaalida ka taageera sidii loo gaari lahaa is-afgarad ku saabsan arrimaha la isku haysto ee siyaasadeed waxaana fuliya Machadka Rift Valley. Somali Dia- logue Platform waxaa maalgeliya Foreign, Commonwealth and De- velopment Office (FCDO) ee Boqortooyada Ingiriiska, Wasaaradda Arrimaha Dibadda ee Denmark, iyo Hay'adda Mareykanka u Qaa- bilsan Horumarinta Caalamiga (USAID). Aragtiyada faallada kama turjumayaan siyaasadaha rasmiga ah ee Dowlada UK, Dowlada Denmark ama Dowlada Mareykanka. Platform-ku wuxuu leeyahay madaxbannaanida tifaftirka warbixinnaddiisa oo dhan.

Warbixintu waxay isticmaashay xog iyo macluumaad ay diyaariyeen dalladda hay'adaha aan dowliga ahayn ee SONSA, Hay'adda Horumarinta iyo Cilmibaarista Puntland ee PDRC, African Voices Foundation iyo Somali Public Agenda.

MachadkaRift Valley wuxuu ka shaqeeyaa bariga iyo bartamaha Afrika si uu usoo saaro aqoon maxalli ah oo loo adeegsan karo ho- rumarinta arrimaha bulshada, siyaasadda iyo dhaqaalaha.

Xuquuqda daabacaadda © Machadka Rift Valley 2022.

Warbixintan waxaa la daabacay iyadoo la adeegsanayo Creative Commons Attribution-NonCommercial-NoDerivatives License (CC BY-NC- ND 4.0).

Rift Valley Institute

MAKING LOCAL KNOWLEDGE WORK